# Liis-hubineedka Kaaliyaha Daryeelka Guriga ee Shahaadada Haysta

**Certified Home Care Aide Checklist**

Washington State Department of Social & Health Services
Transforming lives

### Hay'adaha Daryeelka Guriga, Guryaha Qoyska Gaangaarka iyo Xarumaha Lagu Xannaaneeyo Waayeelka

### Shuruudaha Waafaqsan Sharciga:

Waxaa khasab kugu ah in aad dhammaysid tababar **75** saacadood ah (Waxaa ka mid ah **5** saacadood oo Jihaynta iyo Ammaanka ah) **120** maalmood gudahooda ee laga joogo taariikhda aad shaqada bilowday ka-dibna noqo Kaaliye Daryeel Guri oo Shahaado Haysta **200** maalmood gudahooda ee laga joogo xiliga aad shaqada bilowday. Haddii aadan ka soo bixin waqtiyada kama dambeyska ah, laguma sii siin doono wax lacag ah. Isticmaal jadwalka waqtiga loo BAAHANYAHAYee soo socda iyo liisto-hubineedka si aad uga soo baxdid waqtiyada kama dambeyska.

## A – La buuxi Qofka aad u shaqaysid si aad u Noqotid Caawiye Daryeel Guri

| | Tallaabada | Xusuusin | ✓ |
|---|---|---|---|
| TALLAABADA 1aad | Buuxi Foomka Oggolaanshaha Baaritaanka Asalka wakhtiga qandaraaska. Baaritaanada Asalka – Bogga Internetka | U isticmaal isla magac isku mid ah dhammaan foomamka oo dhan. Tusaale ahaan: Jonathan, John AMA Johnny | ☐ |
| TALLAABADA 2aad | Lambar raadraac, ee loo yaqaano lambarka Aqoonsiga Su'aasha ama lambarka OCA, ayaa la soo saarayaa waxaanna lagu dul qorayaa foomka Ballanta Sawirka Farahaaga ee aad helayso xilliga qandaraas galidda. **Hayso foomkan** waxaadna ku qortaa lambarka Aqoonsiga Su'aasha/lambarka OCA halkan: ________________________________ | Midaan waxaa loogu baahan doonaa **Codsigaaga Waaxda Caafimaadka (DOH)** | ☐ |
| TALLAABADA 3aad | Qabanqaabi Sawirka Farahaaga in isla markiibai la qaado. Ku qor halkan wakhtiga ballanta: ______________ | Calaamadee kalandarkaaga! | ☐ |
| TALLAABADA 4aad | ✹ **Ka hor inta aadan bixinin daryeel:** Dhammee koorsooyinka tababarka Jihaynta (2 saacadood) iyo Ammaanka (3 saacadood).Waxaad u baahan doontaa shahaadooyinka tababarka ee loogu talogalay koorsooyinkan. Eeg hoosta Tababarka si aad uga hesho tababare la ansixiyey xagga hoose. | Shahaadooyinkan waxaa ay noqonayaan qayb ka mid ah shuruudaha tababarka ee 75 saacadood ah. **120ka maalmood ee lagu dhammaynayo tababarka aasaasiga** ah wuxuu bilaabanayaa taariikhda shaqada lagu siiyo. | ☐ |

## B – Soo dir Codsiga Waaxda Caafimaadka ee loogu talogalay Shahaado iyo Imtixaan

| | Tallaabada | Xusuusin | ✓ |
|---|---|---|---|
| TALLAABADA 1aad | **Dhammee oona soo dir marka laga joogo 14 maalmood shaqaaleynta:** Xirmada **Codsiga HCA** ee Waaxda Caafimaadka.Shirkadda Imtixaanka ee Prometric waxaa ay ka helaysaa macluumaad codsigaaga kaas oo kuu ogolaanaya in aad qaadatid imtixaanka xirfadaha iyo aqoonta ee qoran.<br><br>Waxaa lagaa doonayaa in aad ugu yaraan bixiso hal cinwaan iimayl oo loogu talogalay war-isgaarsiinta DOH iyo Prometric. **DOH waxaa ay u baahan tahay dhammaan dokumeentiyada, ogeysiiska dhammeynta tababarka iyo lacagaha la bixinayo ka hor inta DOH aysan la xiriirin Prometric.** | **Haddii aadan kusoo dirin codsigaaga gudaha 14 maalmood, waxay u baddantahay in aadan awoodin in aad imtixaanka samaysid ama noqotid qof shahaado ku haysta waqtigaaga kama dambaysta ah.** Marka DOH ay hesho codsigaaga, waxaa laguu qoondeynayaa lambar shahaadada aqoonsiga DOH oo 10 tiro ah (HM).<br><br>Isticmaal lambarkan marka aad kala xiriirayso Isuduwaha Shahaadada Aqoonsiga (360) 236-2700 ama marka aad ka helayso macluumaad online-ka ee DOH. | ☐ |
| TALLAABADA 2aad | ✹ Haddii aad tahay qof luuqadiisa Ingiriiska ay tahay mid xadidan (LEP), macnaheedu tahay in awoodaada akhriska, qoraalka iyo ku hadalka aad ku hadashid luuqada Ingiriiska ay tahay mid xadidan, waxaad xaq u yeelan kartaa shahaado dheeraad ku meel gaar ah oo ah 60-maalmood. | KELIYA LEP: Ku calaamadee codsigaaga DOH in aad doonayso shahaadada ku meelgaarka ah. | ☐ |
| TALLAABADA 3aad | Si aad ugu qaadatid imtixaanka Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) luuqadaha Isbaanish, Ruush, Fitnaam, Koriyan, Shiine, Kambodiyan, Laoshiyan, Samowan, Soomaali, Yukreeniyan, Tagalog, Amhaaro, ama Carabi ka dooro/ku calaamadee luuqada aad doonaysid Codsiga Imtixaanka Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA).<br><br>Haddii aad doonayso in aad ku qaadato imtixaanka luuqad aanan ku jirin liiska, waxaad codsan kartaa shakhsi kuugu turjumo luuqadaada adiga oo dhammeystiraya xirmada codsiga diyaafadinta imtixaanidda mareegtada Prometric ka dibna u soo gudbinaya cinwaanka ku yaalla foomkan. | Waxaa ay qaadan karaan codsiyada diyaafadinta/ turjumaanka 30 maalmood.<br><br>DOH waxaa uu diri doonaa iimayl oo ay tahay in aad ka soo jawaabto si loo xaqiijiyo.<br><br>Ka eeg Sanduuqa (Inbox) iimaylka, galalka Junk iyo Spam maalin kasta iimayl ka yimid DOH iyo Prometric ka dib marka aad dhammeysato tababarkaaga! | ☐ |
| TALLAABADA 4aad | U dir lacagaha dhinaca Waaxda Caafimaadka ee loogu talogalay dhammaan lacagta codsiga Waaxda Caafimaadka iyo lacagaha imtixaanka ee shirkada imtixaan Prometric.<br>**FIIRO GAAR AH: Ha soo gudbinin lacagaha ujrada haddii tababarka ay bixiso Iskaashatada Tababarka waxaadna ka calaamadeysaa lacag-bixinta gobolka codsiga.** | La soo dir codsigaaga jeeg ama amar lacag ah. | ☐ |

## C – Isku qor Tababarka

| | Tallaabada | Xusuusin | ✔ |
|---|---|---|---|
| TALLAABADA 1aad | ✸ **Isku qor14 maalmood gudahooda oo laga joogo marka aad bilowday shaqadaada:** Isku qor 70 saacadood ee tababarka aasaasiga ah. | Hel Fasal/Tababare | ☐ |
| TALLAABADA 2aad | ✸ **Lagu taliyey 60 maalmood oo laga joogo marka aad shaqada bilowday**: Dhammee tababarkaaga aasaasiga ah ee soconaya 70 saacadood isla markiiba si aad u hubiso in aad hesho fasallo ku yaalla goobta aad ku nooshahay. | Hubso in aad ka soo baxdid waqtiyada kama dambeyska ah ee imtixaanka iyo shahaadada. | ☐ |
| TALLAABADA 3aad | Marka aad dhammeyso tababarka 75 saacadood ee loo baahan yahay, waxaad xaq u yeelanaysaa in aad qaadato imtixaankaaga Kaaliyaha Daryeelka Guriga (HCA). | Ku calaamadee kalandaariyahaaga taariikhda iyo waqtiyada tababarka! | ☐ |
| TALLAABADA 4aad | Waxaad ka helaysaa Shahaadadaada Dhammeynta 75 saacadood (Shahaadada Tababarka DSHS) tababaraha ay DSHS ansixisey ee ku bara saacadda ugu dambeysa ee tababarkaaga aasaasiga ah ee 75 saacadood. | Tusi dhammaan shahaadooyinka tababarahan/macalinkan. | ☐ |

## D – Imtixaanka Loo marayo Prometric

| | Tallaabada | Xusuusin | ✔ |
|---|---|---|---|
| TALLAABADA 1aad | Ka gudub imtixaanka xirfadaha iyo aqoonta qoran. Ku qor halkan taariikhda iyo meesha imtixaanka: ______________________<br>Qaado wakhtiga imtixaanka koowaad ee lagaaga soo jeediyo dhinaca shirkada Prometric<br><br>Imtixaanka qaado waqto u dhow dhammaadka tababarka si aad u kordhiso awoodaada ka gudbidda/najaxidda imtixaanka. Raadi iimayl ka yimid**Pbt-admit@Prometric.com** oo ku qoran macluumaadka imtixaanka, magacaaga, Lambarka Aqoonsiga Prometric xariiqa mawduuca (Fiiri galalka Inbox, Junk iyo Spam). | Shirkadda Prometric waxaa ay keliya kula soo hadlaysaa iyada oo adeegsanaysa cinwaanka iimayl ee aad ku bixiso codsigaaga DOH.<br><br>Haddii aaddan helin taariikh imtixaan oo iimayl ay kuugu soo dirtay shirkadda Prometric 14 maalmood gudahooda ee ka-dib marka aad dhammeyso tababarka, kala xiriir shirkadda Prometric 1-800-324-4689. | ☐ |
| TALLAABADA 2aad | Haddii aad ku dhacdid imtixaanka, si degdeg ah markale jadwal u samayso. Si degdeg ah ula xiriir shirkadda Prometric si imtixaan mar kale lagaaga qaado.<br><br>Waxaad qaadan kartaa qaybta aad ku dhacday ee imtixaanka laba jeer. Waa in aad bixisaa lacag imtixaan kasta oo aad-ku celisid. | Macluumaadka ku saabsan lambarkaaga shahaadada aqoonsiga waxaa ay ku taalaa mareegtada DOH; Baaritaanka Bixiyaha Shahaadada Aqoonsiga **(HM or PV)**. Marka shahaadadaada aqoonsiga ay sheegayso "Hawlgal ah" waxaad awood u leedahay in aad shaqaysid. Ma awoodid in aad shaqayso 200 maalmood in ka badan adiga oo aanan ka ahayn Hawlgal ah mareegtada DOH. | ☐ |

| Wakaalada | Teleefoonka iyo Faakiska | Cinwaanka Boostada | Iimaylka |
|---|---|---|---|
| **Waaxda Caafimaadka (DOH)** | **Iskuduwaha Shahaadada Aqoonsashada Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA)**<br>(360) 236-2700<br><br>**Adeegga Macamiilka Waaxda Caafimaadka (DOH)**<br>(360) 236-4700 | **Codsiga ugu dir: (Haku darin lacagta)**<br>DOH - Home Care Aide Credentialing<br>P.O. Box **1099**<br>Olympia, WA 98507-1099<br>**Ku soo dir dukumeentiyada kale ee AANAN lala soo dirin codsigii hore:**<br>DOH - Home Care Aide Credentialing<br>P.O. Box **47877**<br>Olympia, WA 98504-7877 | **Mareegtada Waaxda Caafimaadka (DOH):**<br>Kaaliyaha Daryeelka Guriga<br><br>*Imtixaanka qaado sida ugu dhaqsiyaha badan ee uu imtixaankaaga u dhammaado!* |
| **Shirkada imtixaanka Prometric** | **Taleefoon:**<br>1-800-324-4689<br>Soo-dejiso Buugyaraha Macluumaadka (14 luuqadood) si uu kuugu caawiyo in uu kaaga jawaabo su'aalahaaga. | **Cinwaanka Shirkadda Prometric:**<br>Attention: Washington Home Care Aide Program<br>7941 Corporate Dr.<br>Nottingham, MD 21236 | **Iimaylka Shirkadda Prometric:**<br>WAHCA@prometric.com<br><br>**Mareegtada Shirkadda Prometric:**<br>**Shirkada imtixaanka Prometric** |

**Linkiyada Dhakhsaha ah ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA):Ka hel linkiyada hal goob oo ku taalla www.adsa.dshs.wa.gov/professional/training/links**